

Khidmado

Khidmadaha dalabka:

Meel kale ka soo amaasho (maktabad ka baxsan Nacka): 30 kr

Khidmadda la daahidda (waxay khuseysaa amaandaha

da'diisu ka bilaabato 16 sano):

qalabka qof weyn iyo toddobaadkii bilowdaba: 10 kr

halkii wargeys iyo toddobaadkii bilowdaba: 5 kr:

qalabka qof weyn oo sicir leh (lagu kireysto) iyo maalintii:

10 kr (DVD).

Kharashka ugu badan oo la qaado halkii mar oo alaab dib

loo soo celiyo waa 250 kr.

Kharashka bixinta alaab luntay:

buug/cajlad qof weyn: 175 kr

buug carruur: 100 kr

wargeys qof weyn: 50 kr

wargeys carruur: 10 kr

filin iyo cayaarta TV:ga: 500 kr.

Qalabka la amaahdo waxaa lagu gudahaa qiime go'an

ama qiimihii lagu soo iibiyey oo sare.

Khidmadaha kale:

Kireysiga filin ama cajlad cayaarta TV: 20 kr.

MAKTABADDA FISKSÄTRA

tel.: 08-718 8435

Fisksätra Torg 20, 133 41 Saltsjöbaden

fisksatra@forumbiblioteken.se

MAKTABADDA NACKA FORUM

tel: 08-718 9625

Värmdövägen 189, 131 40 Nacka

forum@forumbiblioteken.se


MAKTABADDA ORMINGE

tel: 08-718 8701

Ormingeplan 3, 132 30 Saltsjö-Boo

orminge@forumbiblioteken.se

www.bib.nacka.se



XEERARKA AMAHASHADA IYO KHIDMADAHA

Maktabadaha

Fisksätra
Nacka Forum
Orminge

Forumbiblioteken

Xeerarka amaahda dadka waaweyn

(laga bilaabo 16 sano)

In wax laga amaahdo maktabaddu waa lacag la'aan, laakiin waxaad u baahan tahay kaarka maktabadda.

Caddayn aqoonsi soo qaado si aan kaarka maktabadda kuugu sameynno lacag la'aan adigoo taagan.

Kaarka maktabadda waxaa loo isticmaali karaa dhammaan maktabadaha Nacka. Buugta aad amaahatana waxaad geyn kartaa maktabad kasta oo ku taal Nacka.

Kaarku waa adiga kuu gaar ah oo adiga ayaa mas'uul ka ah isaga iyo waxaad ku amaahataba. Waalidka ayaa mas'uul ka ah waxa carruurta amaahato. Carruurta 7 sano jir ayey kaar kaga sameysan karaan maktabadda.

Kaarka maktabaddu waa mid qof u gaar ah, waana in dhaqso loo xiraa isla marka uu kaa lumaba. Wakhtiga la soo celinayo waxaad amaahatay wuxuu qoran yahay warqadda nuqulka ah oo aad hesho markaad wax amaahaneyso. Xafid! Haddii aysan cid kale sugayn dib ayaad u amaahan kartaa waxaad amaahatay oo wakhtigaad dheereysan kartaa.

Haddii buugtu amaah ku maqan tahay ama ay taal maktabad kale oo Nacka ku taal ama maktabad kale oo dalka meelo kale kaga taal badanaaba waad dalban kartaa. Buugta laga dalbado maktabad ka baxsan Nacka waxaa laga bixinayaa 30 kr buuggiiba.

Buugta laga dalbado maktabad ka baxsan Nacka waxaa laga bixinayaa 30 kr buuggiiba.

Haddii wakhti dambe soo celiso wixii aad amaahatay, waxay maktabaddu kaa qaadeysaa khidmadda la soo daahidda. Waxaa digniin laguugu soo dirayaa SMS ama e-mail.

Haddii qaanta lagu leeyahay kor u dhaafto 100 kr, waxaa lagaa xirayaa inaad wax amaahato.

Haddii aad waxyeelayso ama lumiso buug waxaad bixineysaa kharashkiisa.

Amaahqaate ahaan waxaa waajib kugu ah inaad ogaato xeerarka noo degsan. Amaah aan la soo celin ama qaan laysku yeesho waxay keeni kartaa xuquuqda amaahashada lagaa joojiyo iyo arrinta loo gudbiyo shirkad qaan-ururin.



Forumbiblioteken

Xeerarka amaahda ee carruurta

iyo dhallinyarada

In wax la amaahdaa waa lacag la'aan. Intaad doonto oo buugaag ah ayaad amaahan kartaa oo afar toddobaad soo haysan kartaa. Haddii aadan buugga weli dhammeyn oo uusan qof kale sugayn dib ayaad u amaahan kartaa.

Kaarkaaga maktabadda waxaa loo isticmaali karaa dhammaan maktabadaha Nacka.

Xafid oo ilaali kaarka maktabadda! Adiga ayaa mas'uul ka ah buugaagta aad ku amaahato kaarkaas. Haddii kaarku kaa lumo ama aad weydo ama lagaa xado, ku wargeli maktabadda.

Buugaagta soo celi wakhti fiican waayo waxaa dhici kara in dad kale sugayaan. Waxaad buugaag ka amaahan kartaa maktabad walba oo ku taal Nacka. Haddii aad buugaagta la soo daahdo waxaa SMS ama e-mail laguugu soo dirayaa ogeysiin. Haddii aad waxyeelayso ama lumiso buug waa inaad bixisaa kharashkiisa.

Ku wargeli maktabadda mar walba oo aad beddesho adareeska ama lambarka telefoonka.

Laga bilaabo maalinta buuxsato 16 sano waxaa lagugu dhaqayaa xeerarka amaahda dadka waaweyn.

Mar walba oo aad booqaneyso maktabadda sii qaado kaarka amaahda.

Gacmo furan ku soo dhawoow!